



Seattle
Human Services

**2021 Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada
Dalabka Qorshaha**

Maarso 1, 2021

SHAXDA JAANTUSKA

QORSHAHA		LAMBARKA BOGA
I.	Guudmar	1
II.	Kaalmada Farsamo	2
III.	Taariikhda & Khidada	2
IV.	Shuruudaha Barnaamijka	4

ARJIGA		LAMBARKA BOGA
I.	Tilmaamaha Qaabka	6
II.	Qoraalka Qorshaha & Shuruudaha Qiimaynta	6
III.	Waraysiyada & Dhibcaha Arjiga Wadarta	7
IV.	Shuruudaha Arjiga oo Dhamaystiran	8
V.	Liiska Lifaaqa & Wixii La Xidhiidha	8
	Lifaaqa 1: Liiska Waxyaabaha Laga Duulayo ee Arjiga	9
	Lifaaqa 2: Warqada Sare ee Codka	10
	Lifaaqa 3: Miisaaniyada Barnaamijka Lagu Taliyay	12
	Lifaaqa 4: Miisaaniyada Faahfaahsan ee Qorshaha Shakhsi Ahaaneed	14

Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka Seattle

Dalabka Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada ee 2021 ee Tilmaamo

QORSHAHA

I. Guudmar

Mudaharaadka lagaga soo horjeedo waxyeelada bilayska, gaar ahaan bulshooyinka Madaw, ayaa Maraykanka oo dhan iyo caalamka ku faafay kadib markii la dilay George Floyd. Sida magaalooyin badan oo kale, baaqa cadaalada iyo xalka ay bulshadu hogaaminayso ee soo afmeerka cadaalada, oo ay wadaan qaban qaabiyayaasha Madaw iyada oo iska kaashanayaan qoomiyado badan iyo dhaqano badan oo ay gacan saar la leeyihiin, waxa ay muujinayaan oo ay wadaan dadaalka ka socda Seattle. Soo qaban qaabintan, sharciya lagu kordhinayo maalgelinta dib u qaabaynta amaanka bulshada ayaa la ansixiyay Seattle.

Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka Seattle (The Seattle Human Services Department, HSD) waxay doonaysaa arjiyada 2021 ee Dalabka Dhisaha Awooda Amaanka Bulshada Qorshaha ah (Community Safety Capacity Building Request for Proposals, RFP) oo ay ka yimaada kooxda bulshadu hogaaminayso ee ka shaqaynayaya soo afjarida iyo dib u qaabaynta amaanka Madawga, Dadka Dhaladka iyo Dadka Midabka ah (Black, Indigenous, and People of Color, BIPOC) ee ay bulshadu wado, kuwaas oo diirada si gaar ah u saaraya Dadka Madaw Dhaladka ah, Laatiinoooska, Jasiiradaha Baasifiga, iyo Soo Galaytida iyo Bulshooyinka Qaxootiga ah. Ujeedada deeqdan waxaa weeye in la dhiso awooda kooxda ka shaqaynaysa xalka ay bulshadu wado si loosoo afmeero tacadiga oo loo kordhiyo amaanka.

Dalabka Qorshaha (Request For Proposal, RFP) ee Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada waxay tahay maalgelintiisu celcelis ahaan \$10,400,000 oo maalgelin hal mar ah mudada qandaraaska Julaay 1, 2021 ilaa Diseember 31, 2022. Mudada ay ku eeg tahay ee la keenayo arjiga oo buuxaa waa **12:00 duhurnimo Jimcaha, Abriil 9, 2021**. RFP-gan waxa uu u furan yahay hay'adaha buuxiya heerka [Shuruudaha Ugu Yar ee U Qalanka Hay'ada Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka \(Human Services Department, HSD\)](#) iyo wixii shuruuda ah ee dheeraad ah ee lagu sheegey Qaybta IV ee tilmaamahan. Hadii hay'adaada ayna buuxinin shuruudaha ugu yar ee u qalanka, helitaanka kafaale qaade miisaaniyada oo buuxiya shuruudaha ayaa la ogol yahay. Shuruudaha kafaale qaadaha miisaaniyada waxaa laga heli karaa [boga deeqda](#) ee Khayraadka Nidaamka Deeqda. Shirkado Khasaare Xadidan (Limited Liability Companies, LLCs) ayaa la ogol yahay in lagu dalbado RFP-gan. Ilaa 40 qorshayaal ayaa la maalgelin karaa.

Dhamaan qaban qaabiyayaasha ka shaqaynaya sidii loo abuuri lahaa xaalada amaanka ah, oo ay ku jiraan soo afjarka tacadiga iyo yaraynta danbiga, ayaa lagu dhiiri gelinayaa inay dalbadaan, oo mudnaanta waxaa la siinayaa kooxda bulshada ee ay hogaaminayaan Madaw, Dadka Dhaladka ah, Laatiin, Jasiirada Baasifiga, iyo Soo Galaytiga iyo Qaxootiga, maadaama oo ay yihiin cida ay saamaynta ugu badan ku leedahay hayb soocu, nidaamyada cadaadisku, iyo waxyeelo kaga yimaada tacadi iyo nidaamka sharciga danbiga. Adeegyadu waa inay ka dhacayaan Seattle.

Dhamaan qaban qaabiyayaasha buuxiya shuruudaha ugu yar ee u qalanka waa la waraysan doonaa. Su'aalaha waraysiga iyo shuruudaha waxaa la bixin doonaa ugu yaraan hal todobaad kahor waraysiga la qorsheeyay.

Jadwalka 1: Wakhtiga RFP

Jadwalka*	
Bixinta RFP	Isniin, Maarso 1, 2021
Madasha Macluumaadka Webinar (Ka qayb galku maaha waajib oo isduwaan gelin looma baahna.) Ku Biir Kooxda MS Kulanka Microsoft Teams Kaga qayb galay kombuyuutarkaaga ama mobile app Halkan guji si aad uga qayb gasho kulanka Ama taleefan (cod kaliya) +1 206-686-8357,510827368# United States, Seattle	Khamiis, Maarso 11, 2021 1:00 duhurnimo. - 2:30 duhurnimo. Madasha Macluumaadka waxaa la duwaan gelin doonaa oo laga helayaa Jimce, Maarso 12 Websaytka Deeqda HSD Hadii aad u baahan tahay qaabilaad, fadlan kala xidhiidh Natalie Thomson natalie.thomson@seattle.gov

Aqoonsiga Shirka Taleefanka: 510 827 368# Hel lambar deegaanka ah Dib u samee PIN-ka Macluumaad Dheeraad ah Ka Oggow Ikhtiyaarada kulanka	
Maalinta Ugu Danbaysa ee Soo Gudbinta Su'aalaha	Isniin, Abriil 5, 2021 markay tahay 5 galabnimo.
Mudada Uu Ku Eeg Tahay Arjigu	Jimce, Abriil 9, 2021 markay tahay 12:00 duhurnimo. (duhurnimo)
Waraysiyada	Maay 5, 2021 - Maay 28, 2021
Wargelinta Abaal Marinta La Qorsheeyay	Jimce, Juun 11, 2021
Taariikhda Heshiisku Ku Eeg Yahay	Khamiis, Julaa 1, 2021

*HSD waxay xaq u leedahay inay badasho wixii taariikh ah ee mudada RFP.

Dhamaan macluumaadka iyo wixii loo baahan yahay ee ku saabsan RFP waxaa laga heli karaa [websaytka Fursadaha Maalgelinta HDS](#). HSD ma bixiso wargelin shakhsi ahaaneed oo isbadalada ah, oo hay'adaha ayaa ka masuul ah inay si joogtada ah ugala socdaan websaytka wixii isbadal ah. HSD ma bixin doontaa wixii kharash ah ee hay'aduhu ay ku geli doonaan inta ay diyaarinayaan arjigooda, bixinta macluumaadka ay dalbatay HSD, ama ka qayb galka nidaamka doorashada.

Turjubaad qaar macluumaadka ayaa la heli karaa.

Hadii aad qabto su'aalo, fadlan kala xidhiidh: Natalie Thomson, Isku Duwaha Nidaamka Deeqda, natalie.thomson@seattle.gov.

II. Kaalmada Farsamo

Iyada oo laga duulayo fikirka laga heley HSD iyada oo la iskaashanayo lataliyaha farsamo, **Manal Al-ansi, T.E.N. Lataliyayaasha (manal@ten-consultants.com) iyo Yasmin Habib, Habib Lataliye (habibconsultingllc@gmail.com)**, si loo bixiyo madalo kaalmo oo dheeraad ah oo loogu talo galay hay'adaha bulshada ku salaysan inay helaan taageero dheeraad ah inta ay wadaan qorshahooda.

T.E.N. Lataliyayaasha iyo Latalinta Habib ayaa gacan ka gaysan kara bayaaminta su'aalaha arjiga iyo miisaaniyada, ka fikirka la curinta qorshaha dalbadaha, iyo naqdinta qabyo qoraalka qorshaha. Lataliyaha farsamo uma qori doono qorshaha dalbadaha.

Madasha kaalmada dalbadaha waxaa la qaban doonaa balanteeda inta u dhaxaysa Maarso 1 ilaa Abriil 5, 2021. Kaalmada farsamo waxaa lagu qaban doonaa maqal iyo muuqaal.

Dalbadaha waxaa si wayn loogu dhiiri gelinayaa inuu qabsado badanta wakhti hore. Dalabyo faro badan ayaa lasoo gudbiyaa marka ay soo dhawaato wakhtiga ay ku eeg tahay taas oo keeneysa inay harqiso lataliyayaasha farsamo. Hadii ay yaraato sida loo heli karaa, mudnaanta waxaa la siinaya balamaha madalaha kaalmada hay'adaha ay hogaamiyaan shacabka diirada la saarayaa iyo hay'ada miisaaniyadooda ay ka yar tahay \$1,000,000. Si aad u qabsato balanta madasha kaalmada, la xidhiidh manal@ten-consultants.com ama habibconsultingllc@gmail.com isticmaal khadka mawduuca: "Dalabka Madasha Kaalmada ee Amaanka ee RFP (Requesting Help Session for Safety RFP)."

III. Taariikhda & Khidada

A. La Shaqaynta Bulshada

Si loogu sheego RFP, HSD waxa ay qabatay la shaqayn cida danaha ay kaga jiraan madalo ah inta u dhaxaysay Janaayo-Februaayo 2021. Madalahan waxa ka qayb geley xubnaha bulshada ee khibrad u leh la noolaanshaha cunsuriyada iyo tacadiga qaabaysay iyo waxyeelada nidaamka sharciga ee danbiga, iyo sidoo kale cida hormoodka ka ah iyo shaqaalaha hogaanka ee hay'ada bulshada ku salaysan (community-based organizations, CBOs) oo wada shaqooyinka amaanka bulshada.

Ka qayb galayaasha ayaa sheegaya barnaamijyada ku xeeran mulkiyada bulshada, aqoonsiga nafta, iyo isku halaynta, oo waxay aragti balaadhan u leeyihiin amaanka bulshada oo gaadhaya wax ka sareeya yaraynta tacadiga hubka ama tacadiga guriga dhaxdiisa iyo tacadiga galmada ilaa heerka dareenka amaanka balaadhan iyo badqabka. Waxyaabaha ugu waawayn waxaa kamid ah:

- Amaanka bulshadu wuu balaadhan yahay; waa in la qeexaa oo ay yeeshaan sakhsiyaadka iyo kooxda laftoodu.
- Sharaxa amaanka bulshadu waa inay noqotaa mid qalbiga ah oo loo siman yahay.
- Waxaa jira qaybo amaanka bulshada ah oo ku lug leh bogsashada nidaamyada cabudhinta, sida nidaamka sharciga danbiga, ama talaabada tacadiga (oo u dhaxaysa jidh ilaa dareen), iyo sidoo kale dareenka rajada iyo aqoonsiga nafta.
- Ka bogsashada waxaa loogu talo geley dadka waxyeelada keenay iyo dadka usoo joogay waxyeelada.
- Waxaa muhiim ah in la qaado murtida bulshooyinkeena; in la iska ilaaliyo in qaab gaar ah ay inagaga dhagto ama nidaam qaran maadaama oo xubnaha bulshadu ay garanayaan waxa loo baahan yahay.
- In dib loo qaabeeyo amaanka bulshadu kaliya ma noqon karto qaab kale oo shaqada lagu wado.

Marka shaqaalaha adeega bixinayaa ay ku jiraan wada sheekeysiga la shaqaynta bulshada, waxay sheegaan barnaamijka ku xeeran awooda, kaas oo ay kamid tahay:

- Sharaxa dhismaha awooda waa inuu balaadhan yahay oo aan kaliya lagu darin dhismaha iyo xoojinta qaabka.
- Dhismaha awooda oo leh maalgelinta halka mar waxa ay ka dhigan tahay in kooxaha ay yeeshaan dabacsanaanta ugu badan iyo inay iyagu jihaysanayaan waxa ay ku bixinayaan.
- HSD waa inay cadaysaa kharashka la ogol yahay iyo ka aan la ogolayn.
- Heshiiska waa in la bixiyaa oo waxa la ogol yahay deeqda hormarinta ee hay'adaha yaryar.

B. Khidada Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada

Marka ay bulshada iyo xeer dejiyayaasha nidaamka amaanka bulshada Seattle ay dib u qaabeeyaan, RFP-ga Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada waxaa lagu maal gelin doonaa dadaalka lagu baaladhinayo awooda xalka ay bulshadu horseedo ee gacan ka gaysanaya amaanka bulshada guud ahaan - oo ay ku jirto soo afjarida tacadiga iyo yaraynta danbiga. Maalgelinta dhismaha awooda farsamo ayaan waxtari karin oo xataa waxyeelo ku keeni karaa Dadka Madaw, Dhaladka ah, Laatiinka, Jasiiradaha Baasifiga, iyo Soo Galaytiga iyo Qaxootiga hay'adaha ay hogaamiyaan iyo bulshooyinka.

Ujeedada RFP-gan, dhismaha awooda waxaa lagu sheegaa inuu yahay "awood balaadhinta xalalka bulshadu wado ee gacan ka gaysanaya amaanka bulshada ee guud iyada oo la samaynayo oo la xoojinayo xirfadaha, awoodaha, nidaamyada iyo khayraadka hay'adaha iyo bulshadu u baahan yihiin si ay usii jiraan, la qabsiga iyo magoolka."¹

Iyada oo laga duulayo la shaqaynta bulshada iyo fikirka dadka dantu kaga jirto, RFP-gan waxa uu leeyahay qaab wax ka badal awooda dhismaha oo lagu arko korniinka hay'adaha sida:

- loo joojiyay kalsooniada qotada dheer
- ka shaqeeya fahanka iyo ka jawaabida qaabka jira iyo mabda'da dhaqanka hay'ada
- ku dhiiri gelinta kooxaha inay khibrad gaar ah u yeeshaan, oo ayna noqon kuwa soo kooba
- ka faa'idaysiga shabakada si loo abuuro awood, iyo nidaamyada isbadalka
- maalgelinta badqabka gudaha iyo korniinka hogaamiyaha
- bixinta maaxinta, fursado dhismaha awooda oo dhawr lakab ah²

RFP-ga Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada waxaa loogu talo geley inay is waafaqaan adeegyada ay bulshadu wado iyada oo ay jiraan dadaal socda oo dib loogu eegayo amaanka bulshada Seattle. Wixii hay'ada ah ee ka shaqeeya kahortaga tacadiga iyo amaanka bulshada ee ka shaqeeya Seattle ayaa lagu dhiiri gelinayaa inay dalbadaan. La shaqaynta bulshada HSD ee 2019 iyo 2021, Iskaashiga Soo Afjarida Tacadiga Jinsiga Ku Salaysan/Waaxda Degmada King ee Bulshada iyo Adeegyada Bilaa Aadan *Kahortaga Qaabaynta 2020: Warbixinta Hore ee Iskaashiga Soo Afjarida Tacadiga Jinsiga Ku Salaysan*, la ogaaday inuu **kalsoonida ku xeeran yahay iyo qaabka waxka badalka** sida ay dhigayaan nidaamyada dhismaha dhaqanka amaanka.

¹ Blumenthal, *Maalgelinta Dhismaha Awooda: Tilmaamaha Qaababka Saamaynta Ugu Badan*, 2003

² Nishimura, Sampath, Le, Sheikh, Valenzuela, *Dhismaha Awooda Gaadiidka*, Qiimaynta Ikhtiraaca Bulshada Stanford 2020, pp33-36

IV. Shuruudaha Barnaamijka

Ka qayb galayaasha la siiyo waxaa looga baahan yahay inay ka qayb galaan kulamo la isku duba diray oo nidaamyada magaalada oo dhan ah oo bile ah (inta jeer ee la qabanayo kulamadu way is badalaysaa). Isku duba ridka nidaamyada waxa ay kordhin doonaan aqoonta bixiyaha ee adeegyada la heli karo, waxa ay dhiiri gelin doonaan nidaamka guddinta, oo waxa ay xoojin doonaan shabakada amaanka bulshadu wado ee adeegyada. Sidoo kale, isku duwida ayaa muhiim u ah bandhiga ansixinta natiijada bulshadu wado iyo kordhinta macquuliyada iyo helitaanka adeegyada uu bixiyo Barnaamijka Amaanka Bulshada Seattle, iyo sidoo kale dalada gobolka oo dhan ah ee bixiyayaasha adeegyada bulshada. Kuwa soo socdaa waxaa weeye shuruudaha barnaamijka ee RFP.

A. Bulshooyinka Diirada La Saaray iyo Mudnaanta

Bulshada diirada la saaray waxaa weeye qoomiyado iyo isiro gaar ah oo kamid ah bulshada mudnaanta la siiyay ee ugu badan ee laga sadbursaday aagag maalgelinta. Bulshada diirada la saaray waa:

- Madaw/Maraykanka Madaw
- Hisbaani/Laatiino
- Maraykan Dhalad ah/Dhalad Alaaska
- Jasiirada Baasifiga
- Soo Galayti iyo Qaxooti

Shacabka mudnaanta ah waxaa lagu sheegaa kooxda (ama kooxaha) ka soo jeeda cida gaar ah shacabka ah (dad waayeel ah, dhalinyaro, qoysas, iwm.) ama mushkilad gaar ah ay ka dhaxayso (caafimaadka habdhaqanka, tacadi usoo joogay, iwm.). Shacabka soo socda ayaa lasiiyaa mudnaanta, iyo gaar ahaan kuwa usoo joogay cabudhin lakabyo kala duwan ama sare:

- Caruurta
- Dhalinyarta iyo dadka yaryar
- Dadka hore loo xidhay ama iminka ku jira jeelasha
- Bilaa guri ama aan haysan guri
- Soo galayti iyo qaxooti, gaar ahaan dadka aan waraaqo haysan
- Dadka waxyeelo cid gaadhsiiyay hore
- Dadka isticmaala mukhaadaraadka
- Dadka laxaadka la'
- Dumarka jidhkooda ka ganacsada
- Dadka jinsigooda badalay
- Bulshooyinka Khaniisiinta (LGBTQ)
- Ciidanka hawl gabay
- Dumarka iyo dadka dumar u ololeeya

B. Qorshaha Waxqabadka La Filanayo

Heerka barnaamijka dhismaha awooda waxaa laga wada gorgortami doonaa wakhtiga la curinayo heshiiska oo waxaana si toos ah lagu sheegi doonaa qorshayaasha. Heerka barnaamijka waxaa lagu doonayaa in lagu muujiyo korniinka/qoto dheeraanta awooda hay'ada iyo in la kordhiyo saamaynta. Kadib RFP-kan, Dalabka Heerka Aqoonta (Request for Qualifications, RFQ) ayaa la siin doonaa kooxda qiimaynta si ay ula shaqeeyaan dhamaan dadka la siiyay muujinta heerka hormarka bulshada.

C. U qalanka gaarka ah ee RFP, macluumaadka, iyo shuruudaha heshiiska

Dalbadayaasha buuxiya shuruudaha soo socda ayaa la siinayaa mudnaanta:

1. Hadii ay Noqdaan Koox ama Hay'ada Bulshadu Hogaamiso

Koox ama hay'adaha ay bulshadu hogaamiso:

- Inay aqlabiyaha (51% ama wax ka badan) dadka ka masuulka ah kooxdaada kasoo jeedaan bulshooyinka loo shaqaynayo;
- Ay ka go'an tahay inay dhisaan awooda bulshada iyo/ama taageerada bogsashada ee saamaynta cabudhinta;

- Ay diyaar u yihiin inay ka jawaabaan cabudhinta gudaha; iyo/ama
- Ay u shaqaynayaan dhamaan xubnaha bulshada oo ay ka go'an tahay inay soo afjaraan dhamaan noocyada cabudhinta, oo ay kamid tahay ableism, homophobia, transphobia, iyo misogyny³.

Hadii uu yahay barnaamij ay wado hay'ada balaadhan, **barnaamijka** waa inuu buuxiyaa shuruudaha kooxda bulshadu hogaamiso.

Cida lala shaqaynayo iyo wada shaqaynta ayaa la dhiiri gelinayaa marka ay macquul tahay oo ay dan ugu jirto bulshada baahan.

2. Tirada Qorshayaasha

Iyada oo hay'adaha bulshada iyo kooxuhu lagu dhiiri gelinayo inay la shaqeeyaan oo ay taageeraan shaqada midba mid kale, arjiyada waa in aanay noqon laba.

3. Isku Duba Ridka Qaabaysan, Macluumaadka iyo Uruurinta Macluumaadka, iyo Qiimaynta

Dhamaan dalbayaasha deeqda waxaa looga baahan yahay inay ka qayb galaan kulamada isku duba ridka nidaamyada oo ay ku jiraan uruurinta macluumaadka, qiimaynta iyo waxbarashada dadaalka ah. Tani waxay keeneysaa dhismaha xidhiidhka, wadaagista khayraadka, iyo in la bilaabo in la sameeyo muujinta heerka bulshada ee amaanka. Kooxdan waxaa u fududayn doona kooxda banaanka ah (magaalada ahayn).

4. Goobta Deegaanka

RFP-gan, adeegyada barnaamijku waa inay noqdaan Magaalada Seattle dhexdeeda. HSD waxa weli ka go'an nidaamka qaabka deegaanka ah iyada oo ay la shaqaynayso hay'adaha ka shaqeeya shaqooyinka Degmada King dhexdeeda ah.

5. Tilmaamaha Amaanka COVID-19

Hay'adaha bulshada waxaa looga fadhiyaa inay u hogaansamaan nidaamka caafimaadka wakhtigan, munaasab ah siday sheegeen [Caafimaadka Shacabka Seattle- Degmada King](#), si looga hortago faafida COVID-19.

³ Xafiiska Seattle ee Xuquuqda Madaniga ah, Samaynta Deeqda Wada Shaqaynta 2020: Ikhtiraada Kale ee aan Xadhiga Ahayn ee Bulshada iyo Dalabka Ilaalinta ee Qorshaha, Sebteember 18, 2020.

Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka Seattle

2021 RFP-ga Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada

ARJIGA

I. Tilmaamaha Qaabka

Arjiyada waxaa lagu qiimayn doonaa kaliya macluumaadka lagu dalbaday 2021 RFP-ga Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada, oo waxaa kamid ah wixii bayaaminta macluumaadka ee lagu dalbaday HSD. Qayb kasta si dhamaystiran uga jawaab. Haku darin warqada sare ama waraaqaha macluumaadka arjigaaga. Arjiyada aan raacin qaabka waxaa dhici kartainaan la qiimaynin. Wixii dalabka turjubaada ah la xidhiidh: natalie.thomson@seattle.gov.

Qaababka loogu baahan yahay arjiga qoraalka ah:

- nooca iyo farta cabirkeeda (8 ½ x 11-inji) warqad
- isticmaal hal inji qaab ah, hal meel oo banaan, iyo cabirka ugu yar 11-dhibcood farta ah
- inayna ka badan 6 bogag (lifaaqa la dalbaday laguma tirinayo tirada bogaga).

II. Qoraalka Qorshaha & Shuruudaha Qiimaynta

Jawaabta warbixinta qoran ee dhamaan qaybaha A-E. Si buuxda qayb kasta uga jawaab sida ay dhigayaan su'aaluhu. Haka badin isu gayn 6 bog.

A. TAARIKHDA HAY'ADA, KHIRADA IYO SHAQADA BULSHADU HOGAAMISO (30 dhibcood)

1. Nooga waran taariikhda hay'adaada, khibradeeda iyo shaqada aad qabataan. Sidee ayay shaqadan ay bulshooyinka Madaw, Laatiinka ah, Jasiirada Baasifiga, Soo Galaytiga ama Qaxootigu ugu yihiin bartilmaameed?
2. Miyay hay'adaada hogaamiyaan cid kamid ah bulshooyinka diirada la saaray? Fadlan sharax.
3. Maxaa keeney in kooxdaada ama hay'adaadu ay noqoto kuwa ku haboon shaqadan?
4. Sideed u xaqiijinaysaa in qaabka la dagalaanka isir nacaybka, jinsi nacaybka, iyo haybsoocu inay badhtame u yihiin shaqada aad qabanaysaan?

Shuruudaha Qiimaynta - Arjiga xoogan waxa uu buuxiyaa shuruudaha dhamaan ee hoose.

- Dalbayaashu waxay muujinkaraan sida ay diirada uga saarayaan bulshooyinka Madaw, Dhaladka ah, Laatiinka, Jasiiradaha Baasifiga, Soo Galaytiga ama Qaxootiga shaqadooda. (8 dhibcood)
- Hay'ada dalbanaysa ee uu hogaamiyo mid ama wax ka badan oo bulshada diirada la saarayo ah. (8 dhibcood)
- Hay'ada dalbanaysa oo muujisa khibrada ka shaqaynta amaanka bulshada. (8 dhibcood)
- Dalbadaha si cad u sharaxa sida ay u xaqiijinayaan qaabka la dagaalanka cunsuriyaynta jinsiga iyo galmada oo bartilmaameed u ah shaqada ay u qabtaan bulshooyinka BIPOC. (6 dhibcood)

B. HIMILADA AMAANKA BULSHADA (25 DHIBCOON)

1. Waa maxay walaaca bulshada ee qorshuhu uu ka jawaabayaa?
2. Miyuu dalabkan buuxinayaa gal daloolada adeegyada hore u jiray ama ka jawaabayaa baahiyaha kale ee amaanka bulshada ee aan la buuxin? Fadlan sheeg.
3. Guushu sidee ayay u eeg tahay oo maxaad ku cabiri lahayd?

Shuruudaha Qiimaynta - Arjiga xoogan waxa uu buuxiyaa shuruudaha dhamaan ee hoose.

- Dalbaha oo sheega mushkilada amaanka bulshada ugu muhiimsan (8 dhibcood)
- Dalbaha waxa uu sharixi karaa gal daloolada ama baahida iyo sida loogu buuxinayo qorshahan (8 dhibcood)
- Dalbadaha ayaa sheegi kara oo cabiri kara guusha. (9 dhibcood)

C. HAWLAHA DHISMAHA AWOODA (30 dhibcood)

1. Sharaxa baahiyaha dhismaha awoodaada. Waa maxay hawlaha dhismaha awooda iyo khidadaha ay hay'adaadu fulin doonto 18 bilood ee soo socda (Julaay 2021-Diseember 2022)?

2. Sidee ayay dhismaha awoodaadu kaaga caawinaysaa ka jawaabida mushkilada amaanka ee lagu sheegey qorshaha?
3. Sharax sida hawluhu ay u dhisi doonaan awooda hay'adaada si qaabka ugu wanaagsan loogu isticmaalo ama loogu diyaar garoobo, deeqda mustaqbalka ee balaadhinta adeegyada bulshada oo gacan looga gaysto hormarinta amaanka bulshada iyo kor u qaadida caafimaadka bulshooyinka BIPOC.
4. Hadii nidaamka amaanka COVID-19 sida kala foogaanshaha dadka la sameeyay, sidee ayaad si amaan ah ugu dhaqan gelin karin inta aad wado hawlaha aad sheegtey?

Shuruudaha Qiimaynta - Arjiga xoogan waxa uu buuxiyaa shuruudaha dhamaan ee hoose.

- Dalbadaha ayaa si wanaagsan usoo bandhigay sharaxa baahiyaha dhismaha awooda, hawlaha iyo khidadaha. (10 dhibcoon)
- Dalbaduhu waxa uu si wanaagsan u sharaxaa sida hay'adoodu u kordhisay awooda kaalmada ee amaanka bulshada. (10 dhibcoon)
- Dalbaduhu waxa uu si cad u sharaxay sida hawluhu ay u dhisayaan awooda hay'ada ee dhaqan gelinta deeqda mustaqbalka. (5 dhibcoon)
- Dalbadaha ayaa sharaxay qorshe macquul ah oo uu u dhaqan gelinayo hawlaha isaga oo sidoo kale u hogaansamayo wixii nidaam caafimaad ee COVID-19 ee jira. (5 dhibcoon)

D. MAAMULIDA MACLUUMAADKA IYO MAALIYADA (10 Dhibcood)

1. Macluumaad sidee ah ayaa kuu qorshaysan inaad uruuriso si loo ogaado hadii dhismaha awooda uu yeeshay saamayntii la doonayay?
2. Sideed u isticmaalaysaa macluumaadkaas?
3. Sharaxa sida kooxda ama hay'adu u maamusho maaliyada, dhismaha wixii nidaamka shaqaale ee aad isticmaashay.
4. Ma waxaa kuu qorshaysan in hay'ada kale ay matalayso kafaale qaadaha maaliyada? Hadii ay haa tahay, sheeg magaca hay'ada iyo macluumaadka qandaraaska. (bilaa dhibic)

Shuruudaha Qiimaynta - Arjiga xoogan waxa uu buuxiyaa shuruudaha dhamaan ee hoose.

- Macluumaadka iyo xogtu way xoogan yihiin oo waxay ku wajahan yihiin codka bulshada. (3 dhibcoon)
- Macluumaadka iyo xogtu waxay cabirayaan guusha sidaay sheegeen hay'ada iyo xubnaha bulshadu. (3 dhibcoon)
- Hay'ada ayaa lala xisaabtamayaa. (4 dhibcoon)

E. MIISAANIYADA(5 dhibcoon)

1. Dhamaytirka Barnaamijka La Qorsheeyay iyo Miisaaniyada Shakhsi Ahaaneed (Liqaafta 2 iyo 3) ee hawlaha dhismaha awooda ee aad doonayso in la maal geliyo. Ma sheegin wadarta kooxda ama hay'ada miisaaniyadeed. Kharashku waa inuu muujinayo hawlaha la qorsheeyay iyo natiijada. Miisaaniyada laguma tirinayo 6 bog xadiga ah.

Shuruudaha Qiimaynta - Arjiga xoogan waxa uu buuxiyaa shuruudaha dhamaan ee hoose.

- Kharashka waxaa kamid ah kaliya hawlaha lagu maalgelinayo RFP-gan. (2 dhibcoon)
- Kharashku waa macquul oo waxay ku salaysan yihiin heerka lagu taliyay ee hawlaha iyo natiijada. (3 dhibcoon)

III. Waraysiyada & Dhibcaha Arjiga Wadarta

Dhamaan hay'adaha wada arjiyada ee buuxiya shuruudaha u qalanka ugu waa la waraysan doonaa. Waraysi onleyn ah ayaa mid kasta gaarkeeda loogu qaban doonaa. Waraysiyada waxaa diirada lagu saarayaa hawlaha dhismaha awooda. Su'aalaha waxaa la bixin doonaa ugu yaraan hal todobaad kahor waraysiga la qorsheeyay. Waraysiga iskii ayaa loo siin doonaa dhibcaha oo u ka baxsan yahay dalabka qoraalka ah. Qaybta waraysiga waxay u dhigantaa 100 dhibcood. Isku darka arjiga iyo waraysigu waxay u dhigmaan isugayn 200 oo dhibcood.

IV. Shuruudaha Arjiga oo Dhamaystiran

A. GUDBINTA ARJIGA

Qorshahawaa inay la socdaan:

1. Warqada Sare ee Arjiga oo dhamaystiran oo saxeexan oo laba bog ah (Lifaaqa 2)
2. Warbixinta jawaabta dhamaystiran (6 bog xadid ah)

3. Miisaaniyada Barnaamijka Qorshaha oo dhamaystiran (Lifaaqa 3)
4. Miisaaniyada Faahfaahinta Qorshaha dhamaystiran (Lifaaqa 4)
5. Hadii aad ku dalbaysa wada shaqayn wayn ama qandaraas hoosaad hay'ad kale ah, warqada saxeexan ee lifaaqa ee heshiiska ee Maamulka hay'ada ama wakiilka loo ogol yahay.

Arjiga dhamayskaritan waxa uu ku eeg yahay **Jimce, Abriil 9, 12:00 duhurnimo**. Qorshayaasha waa in lagu soo gudbiyaa [Nidaamka Gudbinta Onleyn ah ee HSD](#) ama iimeel. COVID-19 dartiis, lama aqbalayo dalabyada lagu soo diro faakiska, boosta ama gacanta laga keeno.

1. **Kusoo gudbi Nidaamka Gudbinta Onleynka ah ee HSD** (<http://web6.seattle.gov/hsd/rfi/index.aspx>)
HSD waxay ku talinaynaa in waraaqa la geliyo dhawr saacadood kahor inta aan la gaadhin wakhtiga ay ku eeg tahay si looga hortago hadii aad la kulanto mushkilad dhanka internetka ah. HSD kama masuul ah xaqiijinta in arjigaaga uu soo gaadho wakhtiga mudada ay ku eeg tahay kahor.

Wixii su'aalo ah, faalooyin ama kaalmo Nidaamka Gudbinta Onleynka ah, fadlan kala xidhiidh Monique Salyer: monique.salyer@seattle.gov ama kala hadal (206) 256-5185.

AMA

2. **Iimeelka** ([HSD RFP RFQ Email Submissions@seattle.gov](mailto:HSD_RFP_RFQ_Email_Submissions@seattle.gov))
Lifaaqa iimeelku waxay ku eeg tahay 30 MB. Cinwaanka waa inuu noqdaa: 202104 Community Safety Capacity Building RFP (RFP-ga Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada). Wixii khatar ah ee la xidhiidha gudbinta dalabka ee iimeelka waxaa iska leh dalbadaha. Dalbadayaasha waxa laga yaabaa inay helaan iimeel loogu sheegayo in la heley arjigoodii.

Macluumaadka Hore iyo Sirta ee HSD

Sharcida Duwaanka Shacabka Gobolka Washing (Ka Dhaafida/Bixinta Duwaanka Shacabka ee Sharcida Washington Sharciga Gobolka (oo loo yaqaan Xeerka Dib U Eegida Lagu Sameeyay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) Cutubka 42.56, Sharciga Duwaanada Shacabka) waxa uu sheegayaa **in dhamaan macluumaadka la heley ama ay abuurtay Magaalada Seattle in loo arko inay yihiin duwaanada shacabka Gobolka Washing (Ka Dhaafida/Bixinta**. Duwaanadan waxaa kamid ah laakiin kuma xadidna: Jawaabaha RFP/Q warbixinta ah, xaashiyaha miisaaniyada, wareega guud, wixii kale ee macluumaad RFP/Q ah, oo waxaa kamid ah macluumaadka qoran/ama elektoroonig ahaan la isku waydaarsaday. Sidoo kale, macluumaadka arjiga HSD RFP/Q waxaa la siinayaa gudida qiimaynta xubnuhu iyo dhamaan xubnaha gudida qiimaynta waa inay saxeexaan oo ay u hogaansamaan [Sirta iyo Qarsoodida Bayaanka Danaha](#). **Macluumaadka haybta shakhsi ahaaneed sheega ee macluumaadkan waxaa ka waajiba Sharciga Duwaanka Shacabka Washington oo waxa ka waajibi kara in la siiyo cid kale.**

2021 Dalabka Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada ee Qorshaha Waxyaabaha La Eegayo Arjiga

Waxyaabaha la eego waxaa loo sameeyay si ay gacan uga gaystaan xaqiijinta arjigaaga inuu dhamaystiran yahay kahor inta aan la gudbin. Fadlan ha gudbin foomka oo uu la socdo arjigaagu.

MIYAAD...

- Akhriday oo aad fahantay waraaqaha soo socda ee ku jira [Websaytka Helitaanka Fursada?](#)
- Shuruudaha U Qalanka Ugu Yar ee Hay'ada HSD
 - Macluumaadka Macmiilka HSD iyo Shuruudaha Ka Warbixinta Barnaamijka
 - Shuruudaha Heshiiska HSD
 - Nidaamka Doorashada Fursadaha Deeqda HSD
 - Nidaamka Ambiiilka HSD
 - Qorshaha HSD ee Maalgelinta Adeegyada Dhaqanka Ku Salaysan
 - Xeerarka Haga HSD
 - Muunada Heshiiska Adeegyada Hay'ada Guud ee HSD
- Buuxi oo saxeex 2 bog **Xaashida Sare ee Arjiga (Lifaaqa 2)?***
- Hadii arjigaaga lagu sheego hay'ada aanu la shaqayno oo gaar ah, wakiilka hay'adahan ka socda waa inuu saxeexaa xaashida sare ee arjiga.
- Mala buuxiyay qayb kasta oo jawaabta **Warbixinta?**
- Ma buuxisay Miisaaniada Barnaamijka Dalabka oo dhamaystiran (Lifaaqa 3)?*
- Ma buuxisay Miisaaniyada Faahfaahsan ee Shakhsi Ahaaneed ee Dalabka dhamaystiran (Lifaaqa 4)?*
- Ma ku lifaaqday waraaqaha xoojinta ee soo socda?*
- Xaqiijinta wakhtigan ee xaalada samofalka ama cadaymaha is dhax galka ama xaalada hay'ada sharci ahaaneed, hadii ay ku munaasab tahay

**Waraaqahan kuma jiraan tirada 6-da bog ee qaybta qoraalka dalabka.*

Dhamaan arjiyadu Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka Magaalada Seattle waxay ku eeg yihiin **Jimce, Abriil 9, 12:00 duhurnimo**. Bushqada arjiga ee la helo wixii ka danbeeya wakhtiga ay ku eeg tahay [lama](#) eegi doono. Ka eeg Qaybta I tilmaamaha gudbinta.

Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka Seattle
Dalabka Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada ee 2021 ee Tilmaamo
Xaashida Sare ee Arjiga

1. Hay'ada Dalbanaysa:	
2. Maamulaha/Hogaanka Hay'adaha:	
3. Macluumaadka Kowaad ee Lagala Xidhiidhayo Magaca: Jagada: Cinwaanka: Iimeelka: Lambarka Taleefanka:	
4. Nooca Hay'ada <input type="checkbox"/> Samofal <input type="checkbox"/> Faa'ido Doon <input type="checkbox"/> Hay'ada Shacab <input type="checkbox"/> Waxkale (Sheeg):	
5. Aqoonsiga Cashuurta Federalka ama Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeyaha (Employer Identification Number, EIN) hadii ay ku munaasab tahay:	6. Lambarka Nidaamka Lambarsiinta Caalamiga ah ee Macluumaadka (Data Universal Numbering System, DUNS) hadii ay ku munaasab tahay:
7. Lambarka Liisanka Gacansi ee Washington (WA) hadii ay munaasab tahay:	
8. Barnaamijka Shacabka Diirada la saaro waxa ay noqonayaan dadka loo shaqeeyo (sax dhamaan inta ay khusayso; dadku waa inay lamid yihiin dadka aad ku sheegtey warbixinta inaad u shaqaynayso:	Madaw/Maraykanka Madaw Dhalad Jasiirada Baasifiga Hisbaani/Laatiino Soo Galayti iyo Qaxooti Fadlan fadlan sheeg:
9. Xadiga Deeqda La Dalbanayo:	
10. Miyuu barnaamijkaagu badalayaa shaqada bilayska?	H ama M
11. Miyay hay'adaadu u shaqaysaa sida bilayska oo kale?	H ama M
12. Waxkale? (wixii ujeedo la socod ah ee kale)	_____
13. Degmadee Golaha Deegaanka Magaalada ayuu barnaamijkaagu ku yaalaa? Boga baadhitaanka degmada golaha deegaanka	
14. Hay'ada la Shaqaysa (hadii ay ku munaasab tahay): Magaca Xidhiidhka: Jagada: Cinwaanka:	

limeelka:

Lambarka Taleefanka:

Sharaxa hawlaha ay qorshanayso hay'ada
lala shaqeeyaa:

Saxeexa wakiilka hay'ada lala shaqeeyo: _____

Taariikhda: _____

15. Hay'ada la Shaqaysa (hadii ay ku
munaasab tahay):

Magaca Xidhiidhka:

Jagada:

Cinwaanka:

limeelka:

Lambarka Taleefanka:

Sharaxa hawlaha ay qorshanayso hay'ada lala shaqeeyaa:

Saxeexa wakiilka hay'ada lala shaqeeyo: _____

Taariikhda: _____

Ku dar qaybo dheeraad ah hadii ay yihiin wax ka badan hal hay'ad oo lala shaqeeyo waxa dalbanayaa.

16. Kafaale Qaadaha Maaliyada (hadii ay ku munaasab tahay):

Magaca Xidhiidhka:

Jagada:

Cinwaanka:

limeelka:

Lambarka Taleefanka:

Waxa aan akhriyay oo aan fahmay waraaqaha Shuruudaha Kafaale Qaadaha Maaliyada oo waxa aan u hogaansami doonaa dhamaan wajibaadka hadii dalbadkayga deeqda la i siiyo.

Saxeexa wakiilka kafaale qaadaha: _____ Taariikhda: _____

Saxeexa ogolaanshaha rasmiga ah ee dalbadaha/hogaanka hay'ada

Ilaa inta aan ogsoonahay oo aan aaminsanahay, dhamaan macluumaadka arjigan ku jiraa waa sax oo waa run. Waraaqaha waxaa wada ansixiyay waaxda dawlada ee dalbadaha ee u hogaansami doona dhamaan waajibaadka heshiiska hadii dalbadaha la siiyo deeqda.

Magaca iyo Jagada Wakiilka La Ogol Yahay: _____

Saxeexa Wakiilka Loo Ogol Yahay: _____

Taariikhda: _____

**2021 Dalabka Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada ee Qorshaha
Miisaaniyada Barnaamijka Lagu Taliyay
Julaay 1, 2021 - Diseember 31, 2022**

Nuqulada Excel-ka ee shaxda miisaaniyada waxaa laga heli karaa boga arjiga ee [Websaytka Fursada Deeqda HSD. Eeg Qaybaha BARS \(Lifaaqa 4\) ee balaadhinta qaybaha kharashka.](#)

Magaca Dalbadaha:	
Magaca Barnaamijka La Qorsheeyay:	

Shay	Xadiga Isha Dhaqaale		Wadarta Mashruuca
	Dalabka Deeqda HSD	Waxkale ¹	
1000 - ADEEGYADA SHAKHSI AHAANEED 1110 Mushaharaad (Laba Gelinba & Gelin)			\$
1300 Gunooyinka Shaqada			\$
1400 Dheefaha Kale ee Shaqada ²			\$
QAYB HOOSAAD - ADEEGYADA SHAKHSI AHAANEED	\$	\$	\$
2000 - 4000 - AGABKA, ADEEGYADA KALE & KHARASHKA 2100 Agabka Xafiiska			\$
2200 Agabka Shaqada ³²			\$
2300 Dayactirka & Agabka Hagaajinta			\$
3100 Adeegyada Khabiiirada & Lataliyayaasha ⁴			\$
3140 Shaqada Heshiiska ah ⁵			\$
3150 Ka Shaqaynta Macluumaadka			\$
3190 Adeegyada Xirfadlaha ee Kale ⁶			\$
3210 Taleefanka			\$
3220 Boosta			\$
3300 Kharashka Gaadiidka			\$
3310 Shirarka & Socdaalka			\$
3400 Xayaysiiska			\$
3500 Daabacaada & Koobiyaynta			\$
3600 Caymiska			\$
3700 Adeegyada Laydhka iyo Biyaha Shacabka			\$
3800 Hagaajinta & Dayactirka			\$
3900 Kirada - Dhismaha			\$
Kirada - Agabka			\$
4210 Kharashka Waxbarashada			\$
4290 Kharashka Kale ee Dheeraadka ah ⁷			\$

4999 Hawlaha Dadban iyo Maamulka (F&A) Kharashka ah ⁸			\$
QAYB WADAREEDKA - AGABKA, ADEEGYADA KALE & KHARASHAADKA	\$	\$	\$
WADARTA KHARASHKA	\$	\$	\$

¹ Sheeg isha lacagta gaarka ah ee hoos timaada qaybta sare ee "Kale":	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
³ Agabka Shaqada (Haku Darin Agabka Xafiiska)- Hoos shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
⁵ Shaqaalaha Qandaraaska Ku Shaqeeya - Hoosta shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
⁷ Kharashka Dheeraadka ah ee Kale - Hoosta shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$

² Gunooyinka Kale ee Shaqada - Hoos ka ugu qor shayshay (Haku Darin Agabka Xafiiska):	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
⁴ Adeegyada Khabiirka & Lataliyaha - Hoosta shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
⁶ Adeegyada Kale ee Xirfadlaha - Hoosta shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$
⁸ Kharashka Dadka ee Hawlaha iyo Maamulka (F&A) - Hoosta shayshay ugu qor:	
	\$
	\$
	\$
	\$
Wadarta	\$

⁸ Kharashaadka Dadban ee Hawlaha iyo Maamulka (F&A) - Kharashka waxaa loo yaqaan kharashka dul saarka ama kharashka maamulka. Waxaa weeye kharashkaad ay gasho si loo qabto hawlo shaqo hay'adi oo kamana mid aha kharashka toos ah ama lagu sheegey ka barnaamijka, taas oo markaa ay adag tahay in si sax ah loo qiimeeyo saamida isticmaale kasta. Kharashaadka Dadban ee F&A waxaa kamid ah:

- Maamulka Guud
- Maamulka Waaxaha
- Shaqada iyo Dayactirka
- Duugawga Dhismaha iyo Agabka ee Wixii Raasamaalka Aan Loogala Soo Bixi Karin
- Ribada Raasamaalka Aan Ahayn

Hay'adu miyay leeyahay qiimayn federalku u ansixiyay? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Hadii ay haa tahay, waxa aad sheegtaa qiimaynta.

2021 Dalabka Dhismaha Awooda Amaanka Bulshada Qorshaha
Miisaaniyada Faahfaahsan ee Shakhsiyaadka Qorshaysan
Julaay 1, 2021 - Diseember 31, 2022

Nuqulka excel-ka ah ee shaxda miisaaniyada ee ku jirta boga arjiga [Websaytka Fursada Deeqda HSD](#)

Magaca Hay'ada Dalbanaysa:	
Magaca Barnaamijka La Qorsheeyay:	

Wakhtiga Buuxa ee Hay'ada Waxa U Dhigma (Agency's Full-Time Equivalent, FTE) =	saacadaha todobaadkii			Xadiga Isha Lacagta		
	Jagada Shaqada	Magaca Shaqaalaha	Xadiga Saacadii	Imisa saacadood todobaadkii ayaa lacagta la bixin doonaa	Dalabka Deeqda HSD (\$)	Il Kale oo Deeq
Qayb Hoosaas - Mushaharka						
Gunooyinka Shaqaalaha:						
Sharciga Kaalmada Caymiska Federalka (Federal Insurance Contributions Act, FICA)						
			Hawlgabka			
			Caymiska Shaqada			
			Caafimaadka/Ilkaha			
			Magdhawga Bilaa Shaqada			
			Gunooyinka Kale ee Bilaa Shaqada			
			Qayb Hoosaad - Gunooyinka Shakhsi Ahaaneed			
WADARTA KHARASHKA SHAKHSI AHAANEED (MUSHAHARKA & GUNOOYINKA):						

Bayaaminta BARS ee Kharashka Tilmaamaha Shayga

Barnaamijyada Qandaraaska Hoose Qaata

- 1000 ADEEGYADA SHAKHSI AHAANEED** - Waxaa kamid ah kharashka mushaharka, iyo gunooyinka shaqaalaha ee dhamaan dadka u shaqeeya hay'ada.
- 1100 Mushaharka** - Kharashaadka lagu bixiyay adeegyada shaqaalaha qabtay.
- 1110 Mushaharka (Labada Gelin & Gelin)**- Mushaharka lagu bixiyo adeegyada ay qabteen shaqaalaha labada gelin iyo gelinka shaqeeya.
- 1190 Mushaharaadka Kale** - Mushaharka lagu bixiyay adeegyada ay qabteen shaqaalaha kumeel gaadhka iyo yoomka ahi.
***Tusaale ahaan:** Daraasada caymiska Heshiiska Ganacsi iyo Dhaqaale ee Dhamayskatiran (Comprehensive Economic and Trade Agreement, CETA)*
- 1220 Mushaharka Saacadaha Dheeraadka ah**- Kharashka lagu bixiyo mushaharaadka dheeraadka ah ee adeegyada la qabtay saacadaha ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah.
- 1300 Gunooyinka Shaqada**
- 1310 Sharciga Kaalmada Caymiska Federalka (Federal Insurance Contributions Act, FICA)**
- 1320 Hawlgabka**
- 1330 Daryeelka Caafimaadka**
- 1340 Caymiska Shaqada & Kaalmada Caafimaad**
- 1360 Daryeelka Ilkaha**
- 1380 Magdhawga Bilaa Shaqada**
- 1400 Gunooyinka Kale ee Shaqada** - Kharashka gunooyinka kale ee shaqada ee aan kor lagu sheegin *kaliya* waxaa kamid ah caymiska araga, laxaad la'aanta, caymiska nololsha, barnaamijka kaalmada shaqaalaha, lakiin loo ansixiyay kaabista, iyo qorshaha hawlgabla kharashka lagu maamulo.
- 2000 AGABKA**- Waxaa kamid ah maqaalada ama agabka, ay isticmaaleem.
- 2100 Agabka Xafiiska** - Waxa uu ka kooban yahay agabka iyo alaabta loo isticmaalo xafiiska.
***Tusaale ahaan:** qalabka xafiiska, foomamka iyo shayada yaryar ee agabka ah (qiimahoodu ka yar yahay \$5,000, marka laga tago kombuyuutarka iyo sooftiweerka).*
- 2200 Agabka Shaqada** - Agabka loo isticmaalo in lagu buuxiyo baahiyaha shaqada.
***Tusaale ahaan:** agabka beeraha, kiimikada, dawooyinka, agabka shaybaadhka, agabka nadaafada, cuntada ay bilaa aadanku cunayaan, saliidaha guriga iyo agabka hay'ada.*
- 2300 Dayactirka & Agabka Hagaajinta** - Agabka loo isticmaalo dayactirka iyo hagaajinta.
***Tusaale ahaan:** agabka dhismaha iyo agabka, raniijga iyo agabka raniijga, agabka bamamka, dayactirka gaadiidka iyo agabka yaryar.*
- 2500 Kharashka Shidaalka**
- 2510 Gaasta**
- 2520 Naaftada**
- 2530 Kulayliyaha**

2590 Dhamaan Kharashka Shidaalka ee Kale - MARKA LAGA TAGO Gaasta Dabiiciga ee Washington (Koodhka 3700)

2600 Shayada Ka Shaqaynta Macluumaadka Yar

2610 Kombuyuutarka Shakhsi Ahaaneed & Birtarka - Qiimaha shaygiiba la rakibay wixii ka badan \$1,000 oo ka hooseeya \$5,000.

2620 libsiga Sooftiweerka – Shayada ka yar \$5,000 midkiiba.

3000-
4000

ADEEGYADA & KHARASHAADKA KALE

3100 Khabiiirada & Adeegyada Lataliyayaasha - Adeegyada la qabto ee aan soo noqnoqan. **Tusaale ahaan:** *adeegyada hantidhawrka, adeegyada xisaabaadka, adeegyada sharciga gaarka ah, iyo adeegyada shakhsiyaadka kale iyo qof wakhtigii.*

3140 Shaqada Heshiiska ah - Kharashaadka la siiyay shakhsiyaadka ama ganacsiyada si kumeel gaadh ah ama adeegyada mudada gaaban. **Tusaale ahaan:** *Shaqalaaha, Kelly Girls*

3150 Ka Shaqaynta Macluumaadka - Dhamaan macluumaadka ka shaqayntooda kharashka ah.

3190 Adeegyada Xirfadlayaasha Kale - Adeegyada xirfadlayaasha aan lagu sheegin xaga sare. **Tusaale ahaan:** *Adeegyada nadaafada, adeegyada ilaalinta, adeegyada sawir qaadida (sawirida nidaamka) iyo adeegyada kale ee xirfadlayaasha.*

3210 Taleefanka - Waxa kamid ah rakibaada, taleefanka caalamiga ah, adeegyada gudbinta iyo adeegyada taleefanka ee deegaanka kharashaadka ah.

3220 Boosta - Waxaa kamid ah dhamaan waraaqaha boosta, shaambadaha, ruqsada boosta, iwm.

3290 Xidhiidhka Kale - Waxa kamid ah kharashka Western Union.

3300 Kharashka Gaadiidka - Waxaa kamid ah kirada iyo kharashka gaadiidka.

3310 Kharashka Shirarka & Socdaalka - Waxa kamid ah gaadiidka, cuntooyinka iyo socdaalka ee shaqaaluhu galo isaga oo wada hawlaga xafiiska. **Shirarka iyo socdaalka la ogol yahay ee uu saxeexeen Gudida Maamulka waa inay la socotaa wixii bixinta kharashka shirka iyo socdaalka.**

3320 Gunooyinka Gaadiidka Gaarka ah - Waxaa kamid ah kirada iyo kharashka gaadiidka.

3390 Kharashka Gaadiidka Kale - Waxaa weeye kharashka aan lagu sheegey xaga sare.

3400 Xayaysiiska-Waxaa kamid ah kharashka xayaysiiska, wargelinaha daabacan, casuumada tartanka iyo shayada kale.